

Ogeysiinta hore ee Qoraalka ah

Prior Written Notice — Somali version

Ogeysiinta hore ee qoraalka ah waa mid ka mid ah xaquuqadaha ugu muhiimsan ee waalidku leeyahay xaga waxbarashada gaarka ah. Xuquuqdani oo loo yaqaan Individuals with Disabilities Education act (IDEA) waxay ka mid tahaysharciyadaaysoodajisaydowladafederalka ah in dugsiyadu siiyaan adeego waxbarashada gaarka ah ee loogu tala galay caruurta naafada ah. Marka ilmuhu loo aqoonsado in ay u bahanyahiin waxbarashada garahaneed, sharcian dugsigu waa inuu ogaysiiyaa walidka iyadoo qoraal ah inta uusan talaabo kale qadin. Sidoo kale haduu waalidku codsanayo in ilmahooda ka qeyb qaataan waxbarashada gaar ahaaneed, waa in uu dugsigu iyado qoraal ah walidka la socodsiyaa haduusan dugsigu ku raacsaneyn. Hadii aad wax faah faahin ah u sii baahantahay, waxaan idunku dhiira gelineynaa in aad aqrisid waraaqda cinwaankeedu yahay Qoraalada Ogeysiinta Ogalaanshaha Walidka.

Gormuu dugsiga u baahanyahay in uu siiyo waalidka ogeysiinta hore ee qoraalka ah?

Dugsigu waa inuu walidka la socodsiyaa iyadoo qoraal ah marka uu talaabadaha hoos ku qoran ku dhaqaaqayo ama uusan ogoleyn in uu ku dhaqaaqo.

- aqoonsasho;
- qiimeyn;
- meeleynta waxbarashada ama barnaamij; ama
- waxbarashada lacag la'anta ah ee dadweynaha (FAPE)

Hadaad ka codsato degmada dugsiga in ay wax kuu qabato sida qiimeynta ilmaha ama in ay wax ka bedesho waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga, waxaa laga yabaa in ay degmadu ogolaato ama ay diido codsigaaga. Hadii uu dugsigu ogalaan waayo codsigaaga, waa in si qoraal ah degmada dugsiga kuula soo xiriirtaa sababta ay u gaareen go'aanka. Waa in ay kula socodsiyaan waxyaabaha aad fali karto hadii uusan goankoodu ku qancin.

Waa maxay qoralka ogeysiinta ah?

Ogeysiinta dugsigu u diro walidka waa in ay ka mid ahaadaan:

- ficilada dugsigu doonayo in uu ku kaco ama uusan ogoleyn in uu sameeyo;
- sababta uu dugsigu u doonayo in uu ku kaco ficiladaa ama sababta uusan u doonayn (tusaalo hadaan u soo qadano, sababta uu dugsigu u doonayo in ardayga loogu qoraa dugsiga caadiga ah ee aanan eheyn waxbarashada gaar ahaaneed);
- soo jeedino kale oo ay shaqaalaha dugsiga soo jeediyeen iyo sababta loo diiday soo jeedintaa;
- imtixaanada ama baarista dugsiga sticmaalay si uu go'aanka u gaaro;
- wax walabaa oo wargelin ah oo uu dugsigu isticmaalay ama uu qadariyay si uu go'aankan u gaaro;
- siyaabaha uu waalidka u heli karo qoraalada ay sharciga u leeyihiin hadii aanan la'siin. Kuwasoo loo yaqaan habraaca badbaadada (procedural safeguard).
- dadka ama hay'adaha uu la xiriiri karo waalidku haduu caawimaad uga baahanyahay in uu ogaado waxyaabaha uu xaq u leeyahay.

Maxaa kale ayaan u baahanahay in aan ogaado?

1. Ogeysiinta lagu siinayo waa inay ahaataa:

- mid ku qoran luqad uu dadweynaha good fahmi karo;iyo
- mid ku qoran luqadaada hooyo ama laguugu wargelin karo si aad u fahamto, hadii ay suroowdo.

2. Hadii uusan waalidku laheyn luqad qoran, dabadeedna dugsigu waa in uu:

- afka uga turjimaama ama sida uu waalidku ku fahmi karo;



Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

- waa in uu hubiyaa in walidku hahmay digniinta; iyo
- in iyadoo qoraal ah dugsigu ku cadeeyaa in labada arin ee kor ku xusan uu fuliyay.

Tusaalooyin xaqiiqa ah oo run u dhacay

Tusaalooyinkan hoos ku qoran waxa ay na tusayaan sadex waalid oo kala duwan oo dugsiga ka helay ogeysiinta hore ee qoraalka ah kuwaasoo ah dareen ku saabsan ilmahooda.

Mr. Jones iyo xaskiisa waxay ka heleen waraaq ogeysiin ah dugsiga wilkooda. Dugsigu waxa uu doonayaa in uu wax ka bedelo qorshaha waxbarashada gaarahaaneed (IEP) ee u yaala wiilkooda Sam. Sam waxuu waqtigiisa malinta inta badan ku qaataa fasal u gooni ah waxbarashada gaar ahaaneed. Shaqaalaha dugsiga waxa ayaminsanyihiin in uu Sam ku laaban karo fasalada ardayda caadiga ah hadii uu caawinaad ka helo bare ku taqasusay waxbarasada gaar ahaaneed. Sam waxaa wax lagu baraa fasal u gaar ah ee ah afar saacadood malintii. Hadii fasalka ardeyda caadiga ah loo bedelo, waa in uu lix saacadood oo sadexi tahay waxbarashada gaar ahaaneed qataa.

Ogeysiinta waxay cadeyneysaa howlaha fasalka uu Sam qabtay in ay ku dhowdahay heerka laga doonayo ardayda caadiga ah.

Caawinaada Sam ka helay baraha waxbarashada gaar ahaaneed iyo hawl karnimada uu muujiyay waxay u masaamaxday in uu ku laaban karo fasalka ardayda caadiga ah.

Imtixaano laga qaaday Sam dhowaanahan waxa ay muujiyeen in uu aad u wanaagsan yahay. Siyaabaha daraadeed, dugsigu waxa uu dareemayaa in ay tahay go'aan sax ah.

Ogeysiinta waxaa raacsan waraaq kale. Waraaqdaas oo faraysa waalidka Sam talaabooyinka ay xaquuq u leeyihiin iyo halka ay ka heli karaan cawimaad hadii ay doonayaan in loo fasira xuquuqdaa.

Ka dib markii uu soo gaba gaboobay shir ay lahaayeen qolada qorshaha waxbarashada gaarahaaneed iyo hoyo magaceeda la yirraahdo Ms. Romero iyaga oo ka wada hadlaya daweenta jirka ee wilkeeda Karlos ayaa Ms. Romeero go'aansatay in ay waraaq u dirto dugsiga. Waraaqdaas oo ay ku codsanayso in waqtiga daaweynta laxaadka wiilkeeda Karlos laga siyaadiyaa labo malmood isbuucii oo looga dhigaa afar malmood isbuucii.

Dugsiga waxuu uga soo jawabay waraaq oraneysa ma ay ku raacsana go'aankaa. Shaqaalaha dugsiga waxay waraaqdaa ku sharaxeen, in ay dib u baareen waraaqaha warbixinta daawenta Karlos. Waxaa kale oo ay la tashadeen daaweyaha laxaadka ee la shaqeeya Karlos. Marka ay eegeen warbixinadaa cafimaadka, waxay ogaadeen in Karlos horumar wanaagsan gaarayo. Waxaa kale oo ay ogaadeen hadii uu wanaagaa ku sii socdo, la kulmi doono horumarkii sanadka ee loo qabtay. Sidaa awadeed ayuu dugsigu ku diiday fikradda. Ms. Romero waxaa kale ay dugsiga ka heshey wargelin u tilmaameysa halka ay ka heli karto talaabooyinka ay xaquuq u leedahay iyo talaabadaha ay qaadi karto hadii aysan ku qancin go'aanka dugsiga.

Mr. Tran waxuu ka helay waraaq ogaysiin ah dugsiga gabadhiisu dhigato. Waraaqdaa oo ku qorneyd luqadda Fiyatnaamka oo ah Mr. Tran luqada uu ku hadlo. Waraaqdu waxay socodsiineysaa in shaqaalaha dugsiga aaminsanyahay in Mr. Tran gabadh uu dhalay oo layiraahdo April lugu tuhmayo in ay leedahay karti la'an waxbarasho (learning disability). Dugsigu waxuu doonayaa in la imtixaamo April si loo hubiyo.

Waraaqda ogaysiinta waxaa kale oo ay la socodsiiinaysaa Mr. Tran in baraha gabadha ay si qaas ah u caawiso. Bare kale ee ku taqasusay waxbarashada gaar ahaaneed ayaa si dib ah u eegay hawlaha iyo wax barashada April. Labada bare waxay isku raaceen in April dhibaato ka haysata xaga waxbarashada, waxayna doonayaan in ay ogaadaan sababta.

Marka barayaashu dib u sii egeen hawlaha ay April fasalka ku qabato iyo heerka ay taagantahay waxay ogaadeen in ay dhibaato ka haysato akhriska, qorista iyo hadalkaba. Waxay doonayaan intaaba laga imtixamo. Waxay kaloo doonayaan in lagu sameeyo imtixaan cilmi nafsii ah (psychological testing) si ay u ogaadaan halka ay waxbarashadeeda garsiisan tahay.

Ogeysiintu waxay ku soo gabagabeeyeen in dugsigu uga baahanyahay Mr. Tran in uu bixiyo qoraal ogolaansho ah inta aysan imtixaannada cilmiyeed u bilaabin April. Ogeysiinta waxaa raacsan waraaq kale oo iyaduna ku qoran luqadda Fiyatnaamka ah. Waraaqdaas oo fareysa Mr. Tran talaabooyinka uu xaquuq u leeyahay iyo halka uu ka heli karo cawimaad hadii uu doonayo in loo fasiraa xuquuqdiisa.